# Siyaasadda Xog-dhowrista ee shirkadda *Count the Kicks*

Dhowrista xogtaada ayaa muhiim inoo ah. Siyaasaddan xog-dhowrista waa la soo uruuriyay waana la cusbooneysiiyay si ay si fiican ugu adeegto dadka ka walaacsan sida 'Macluumaadkooda Shaqsiga Lagu Aqoonsan Karo' (PII) in lagu isticmaalo onlaynka. Macluumaadkooda Shaqsiga Lagu Aqoonsan Karo (PII), sida lagu qeexay sharciga xog-dhowrista iyo sugida macluumaadka ee Mareykanka (U.S.), waa macluumaadka la istcmaali karo keligiis ama macluumaadyada kale lala isticmaali karo si loo aqoonsado, loola xiriiro, ama loo helo qof. Fadlan si taxaddar leh u akhri siyaasaddayada xog-dhowrista si aad faham cad uga hesho sida aynu u uruurino, u isticmaalno, u ilaalino ama sida kale u maarayno macluumaadkaaga Gaarka kuu ah ee lagugu aqoonsan karo ee lagu aqoonsan karo sida waafaqsan mareegahayaga iyo app-ka Count the Kicks.

## Waa maxay macluumaadka gaarka ah ee aan ka uruurinno dadka soo booqda mareegahayaga iyo *app-ka Count the Kicks* App?

Markaad cinwaan ka samaysanayso app-kayaga, sida habboon, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad geliso magacaaga, cinwaanka iimaylkaaga, lambarkaaga boostada, lambarka telefoonkaaga ama tafaasiil kale si ay kaaga caawiyaan mahadhadaada.

Markaad tabarucaad bixinayso ama aad dhigaalo ka dalbanayso mareegahayaga, sida habboon, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad geliso magacaaga, cinwaanka iimaylkaaga, cinwaankaaga boostada, lambarka telefoonkaaga ama tafaasiil kale si ay kaaga caawiyaan mahadhadaada ama si laguugu soo diro dhigaalo waxbarasho.

## Goorma ayaan uruurinnaa macluumaadka?

Waxaan kaa uruurinaynaa macluumaadka marka aad cinwaan samaysatid ama aad geliso macluumaadka mareegahayaga ama app-kayaga, ama aad isku diiwaangeliso farriimaha gaagaaban.

## Sidee ayaan u isticmaalnaa macluumaadkaaga?

Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno macluumaadka aan kaa uruurineyno marka aad cinwaan samaysatid, isku diiwaangeliso warsidahayaga, isku diiwaangelisofarriimaha gaagaaban, ka jawaabto su'aalaha sahanka ama wadaxiriirka suuqgeynta, ama aad u isticmaasho qaybo ka mid ah mareegta qaababka soo socda:

- Oggolaanshaha inaan si wanaagsan kuugu adeegno oo aad ka jawaabto codsiyada ka yimaada adeegga macaamiisha
- Gaar yeelida mahadhadaada iyo oggolaanshaha inaan kuu soo gudbino dhigaalada aad aadka u xiisaynayso
- Inaan ku soo dirno xayaysiis, sahan ama qaybaha kale ee sifaadka mareegta
- Codsashada qiimeynta iyo faallooyinka adeegyada ama baddeecadaha

- Dabagalka kadib markaad hesho waraaqaha (weydiimaha iimaylka, farriimaha gaagaaban, ama telefoonka)

## Sidee ayaan u ilaalinaa macluumaadkaaga?

Mareegtayada si joogto ah ayaa loo iskaan gareeyaa si loo sugo daldaloolada amniga iyo dayaca la yaqaan si booqashadaada mareegtayada looga dhigo mid ammaan ah intii suurtagal ah. Waan Iskaan Garaynaa Fayrasyada sida caadiga ah.

Macluumaadkaaga gaarka ah wuxuu ku jiraa shabakado sugan keliyana waxaa heli kara tiro kooban oo dad ah kuwaasoo uu xuquuq gaar ah u siiyay nidaamkan, waxaana looga baahan yahay inay xafidaan oo qarsoodi ka dhigaan macluumaadka. Waxaanu hirgelinaa tallaabooyin kala duwan oo sugida xogta ah marka isticmaaluhu galo, soo gudbiyo, ama helayo macluumaadkiisa si aynu u ilaalino badqabka macluumaadkaaga gaarka ah.

Dhammaan isweydaarsiyada lacageed ayaa la hawlgeliyaa iyadoo loo marayo bixiye sugan mana lagu keydiyo ama laguma farsameeyo saafaradeena.

## U shaacinta qolo saddexaad

Ma iibinno, kama ganacsano, ama sida kale ma u wareejinno dhinacyo ka baxsan shirkadda macluumaadkaaga Gaarka ah ee lagugu aqoonsan karo.

## Gujoraacyada qolyo saddexaad

Marmar, go'aan marka aan ku gaarno, waxaa laga yaabaa inaan ku darno ama ku bixino baddeecooyinka ama adeegyada qolo saddexaad gudaha app-kayaga. Mareegahan ay iska leeyihiin qolyaha saddexaad waxay leeyihiin siyaasado xog-dhowris oo madax-bannaan. Sidaas darteed wax mas'uuliyad ah nagama saarna ama ma dammaand qaaadayno waxa ku jira iyo hawlaha degeladan ku xiran mareegteena. Si kastaba ha ahaatee, waxaan rabnaa inaan ilaalino sharafta iyo sumcadda mareegtayada waana soo dhaweyneynaa wixii faallooyin ah ee ku saabsan degelladan.

## Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud ee Yurub (GDPR)

Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud ee Yurub (GDPR) ayaa dhaqangalay bisha Maayo 25, 2018 wuxuuna nidaamiyaa sida aan ula macaamilno macaamiisha ku sugan dalalka Midowga Yurub. Waxaan qaadnay tallaabooyinka soo socda si aan u hubino u-hoggaansanaanta Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud ee Yurub (GDPR):

- Waxaan cusbooneysiiyay siyaasaddan xog-dhowrista si ay u waafaqdo Qaanuunka Dhowrista Xogta Guud ee Yurub (GDPR).
- Waxaan u dirnay iimayl dadka ku jira liiskayaga iimaylada annagoo ku wargelinay waxyaalaban soo cusboonaaday.
- Waxaan u sheegi doonaa wixii jebinta xogta gaarka ah nidaamiyaha xogta Midowga Yurub (EU) 72 saacadood gudahooda.
- Waxaan u-hoggaansannay shuruudaha si aan u sugno nidaamyada iyo xogta innagoo si fiican ugu dhaqmayna barnaamijyada sugidda xogta.

- Waxaan awood u leenahay inaan aqbalno codsiyada isticmaalida xuquuqaha qofku u leedahay inuu helo, saxo, tirtiro iyo qaadan karo macluumaadka gaarka ah. Mar kasta waxaad codsan kartaa in xogtaada si joogto ah loo tirtiro. Haddii aad rabto inaad codsato in xogtaada la tirtiro, fadlan iimayl u dir info@countthekicks.org.

- Waxaan awood u leenahay inaan aqbalno codsi gaar ah si loo xaddido ama loo diido adeegsiga xogta gaarka ah waana diidi karnaa go'aan kasta oo ku salaysan adeegsiga tooska ah ee xogta gaarka ah.

### Xeerka Dhowrista Xogta Onlaynka ah ee Kaalifoorniya (California Online Privacy Protection Act)

Xeerka Dhowrista Xogta Onlaynka ah ee Kaalifoorniya (California Online Privacy Protection Act, CalOPPA) waa sharciga ugu horreeya ee qaranka ee uga baahan mareegaha ganacsiga iyo adeegyada onlaynka ah inay ku soo dhejiyaan/geliyaan mareegahooda siyaasadda xog-dhowrista. Marka loo eego CalOPPA, waxaanu waafaqsannahay waxyaabaha soo socda:

- Isticmaaleyaasha waxay u soo booqan karaan app-kayaga si qarsoodi ah.
- Siyaasaddan xog-dhowrista ayaad ka heli kartaa mareegtayada, www.countthekicks.org. Waa laguu soo sheegi doonaa isbeddel kasta oo ku yimaada Siyaasadda Xog-dhowrista ee ku jirta Bogga Siyaasaddayada Xog-dhowrista.
- Isticmaaleyaashu wa-ka-beddel ayay ku samayn karaan macluumaadka gaarka ah markay galaan akoonadooda.

### Sidee ayay mareegteena u maaraysaa digniinaha Ha Igu Samayn Raadraac?

Waan ixtiraamnaa digniinaha Ha Igu Samayn Raadraac iyo Ha i Raadraacin, kuukiyada shirkadda, ama ma isticmaalno xayeysiino marka habka barowsarka/il-mariska ee Ha Igu Samayn Raadraac (DNT) uu shaqaynayo.

Ma oggolin habdhaqanka raadraaca ee ay sameeyaan qolyaha saddexaad.

### COPPA (Sharciga Dhowrista Xogta Carruurta)

Markay timaaddo uruurinta macluumaadka gaarka ah ee carruurta da'doodu ka yar tahay 13 sanno jir, Xeerka Dhowrista Xogta Carruurta (COPPA) ayaa dhigayaa inay waalidku u leeyihiin awoodda inay bixiyaan ama diidaan. Guddiga Ganacsiga ee Dawladda (The Federal Trade Commission, United States), wakaaladda ilaalinta macaamiisha ee Maraykanka, ayaa fuliya Xeerka Dhowrista Xogta Carruurta (COPPA), kaasoo qeexaya waxa hawlwadeennada mareegaha iyo adeegyada onlaynka ah ay tahay inay sameeyaan si ay u ilaaliyaan xogta carruurta iyo badqabka onlaynka.

Si gaar ah iidheh/suuqgeyn uguma dirno carruurta da'doodu ka yar tahay 13 sanno jir.

### Dhaqamada Dhexdhexaadka ah ee Macluumaadka

Mabaadi'da Dhaqamada Dhexdhexaadka ah ee Macluumaadka ayaa lafdhabar u ah sharciga xog-dhowrista ee Maraykanka oo fikradaha ay ka kooban yihiin ayaa door weyn ka ciyaara samaynta sharciyadda xog-dhowrista ee aduunka oo dhan. Fahamida Dhaqamada Dhexdhexaadka ah ee Macluumaadka iyo hirgelintooda ayaa muhiim u ah u-hoggaansanaanta sharciyadda kala duwan ee xog-dhowrista ee ilaaliya macluumaadka gaarka ah.

Si aad ula jaanqaado Dhaqamada Dhexdhexaadka ah ee Macluumaadka waxaynu kugu ogeysiin doonaa iimayl ahaan 1 maalin shaqo gudaheeda haddii ay jirto xog lagu xadgudbay.

Waxaan sidoo kale oggolnaynaa in Mabaadi'da Sixitaanka Shaqsiyeedka kaasoo nooga baahan in shakhsiyaadku ay xaq u leeyihiin inay si sharci ah u raadsadaan xuquuqaha la fulin karo ee ka dhanka ah xog-uruuriyeyaasha iyo soo-saareyaasha xogta ee ku guuldareysta inay u-hoggaansamaan sharciga. Mabda'ani wuxuu nooga baahan yahay ma ahan oo keliya in shakhsiyaadku ay leeyihiin xuquuq la fulin karo oo ka dhan ah adeegsadeyaasha xogta, balse sidoo kale in shakhsiyaadka ay xal ka raadsan karaan maxkamadaha ama wakaaladaha dawladeed si loo baaro iyo/ama loo xukumo soo-saareyaasha xogta ee aan u hoggaansamin sharciga.

## Xeerka IIMAYLADA AAN LA RABIN

Xeerka IIMAYLADA AAN LA RABIN waa sharci dejinaya shuruucda loogu talagalay iimaylada ganacsi, dejinaya shuruudaha fariimaha ganacsi, siinayaa loo-direyaasha xaqa ah in laga joojiyo iimaylada iyaga loo diro, oo qeexaya ciqaabta adag ee ku xadgudubka.

Waxaan kaaga qaadnaa cinwaanka iimaylkaaga si aan:

- Kuugu soo dirno macluumaadka, kaaga jawaabno su'aalaha, iyo/ama codsiyada ama su'aalaha kale
- Iidheh ugu dirno liiskayaga boosto ama u sii wadno inaan iimaylo u dirno macaamiisheena kadib marka isweydaarsiga asalka ah uu dhaco.

Si aan u waafaqno xeerka CANSPAM, waxaan oggolnahay waxyaabaha soo socda:

- Inaynu isticmaalin mawduucyo ama cinwaano iimayl oo been-abuur ama marin-habaabin ah.
- Inaynu u aqoonsano farriinta xayaysiis ahaan si caqligal ah.
- Inaynu soo raacino cinwaanka goobta ay ku taalo ama xarunta dhexe ee ganacsigeena.
- Inaynu la socono in adeegyada suuq-geynta iimaylka ah ee qolyaha saddexaad ay u-hoggaansan yihiin sharciyadda, haddii mid la isticmaalo.
- Inaynu si degdeg ah u qaddarino ka bixida/ka noqoshada rukumashada.
- Inaynu u oggolaano isticmaaleyaasha inay ka noqdaan rukumashada iyagoo isticmaalaya gujo-raaca ku yaala qaybta hoose ee iimayl kasta.

Haddi wakhti kasta oo aad joogto aad jeceshahay inaad ka noqoto rukumashada helitaanka iimaylada mustaqbalka ama aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan siyaasaddan xog-dhowrista, waxaad noogu soo diri kartaa iimaylkan ah info@countthekicks.org.

Nala Soo Xiriir

Ugu Dambeyntii La Tifaftiray 01-06-22